



Federal Republic of Somalia  
Federal Parliament  
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS  
Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

| Baarlamaanka 11 <sup>aad</sup>                                                                                                                                                         |                                                                                                                                                                                                                                                                                 |
|----------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|---------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|
| <b>Kalfadhiga:</b> 7aad                                                                                                                                                                | <b>Kulanka:</b> 11aad                                                                                                                                                                                                                                                           |
| <b>Taariikhda:</b> 10 Dec, 2025                                                                                                                                                        | <b>Goobta Fadhiga:</b> Xarunta Aqalka Sare                                                                                                                                                                                                                                      |
| <b>Saacadda uu Furmay:</b> 11:25 AM                                                                                                                                                    | <b>Saacadda uu Xirmay:</b> 12: 33 PM                                                                                                                                                                                                                                            |
| <b>Shir Guddoonka Fadhiga:</b><br>Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare<br>Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi                                                                                   | <b>Guntanka Kulanka:</b> 31 Senator                                                                                                                                                                                                                                             |
| <b>Martida Kulanka:</b><br>1. Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Maaliyadda<br>XFS Mudane Cabdiqafaar Cilmi Xange<br><br>2. Xubno Ka socoda Wasaaradda Cadaaladda iyo<br>Arimaha Dastuurka. | <b>Ajendayaasha Kulanka:</b><br>1. Akhriinta Ayadaha Qur'aanka.<br>2. Ansaxinta ajendaha.<br>3. Akhrinta 1 <sup>aad</sup> ee Hindise sharciyeedka<br>Hanaanka Lacag Bixinta Qaran.<br>4. Akhrinta 2 <sup>aad</sup> ee Hindise sharciyeedka<br>Cadaaladda Da'yarta Soomaaliyeed. |

**Furitaanka Kulanka:**

Senator Cabdiwali Maxamed Ibraahim (Xaabsade) ayaa akhriyey Aayadaha Qur'aanka ee Kulanka lagu furay.

**Ansixinta Ajendayaasha Kulanka:**

Guddoomiyaha Golaha Sanator Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajendayaasha kulanka, codaynta ayaana u dhacday sidaan:

**Oggol: 30 Senator**

**Ka aamusay: Majirin**

**Diidmo: Majirin**

**Nuxurka Kulanka:**

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa u yeeray Wasiir ku-Xigeenka Wasaaradda Maaliyadda XFS Mudane Cabdiqafaar Cilmi Xange si uu Golaha uga hor akhriyo warbixinta akhrinta 1<sup>aad</sup> ee Hindise-sharciyeedka Hanaanka Lacag Bixinta Qaran. Warbixinta kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa u yeeray Guddoomiyaha Guddiga Garsoorka, Cadaalada, Arrimaha Diinta iyo Xuquuqul Insaanka Aqalka Sare Senator Naciima Xasan Xaaji Maxamuud si ay Golaha uga hor akhriso warbixinta akhrinta 2<sup>aad</sup> ee Hindise sharciyeedka Cadaaladda Da'yarta Soomaaliyeed. Warbixinta kaddib, 8 senator ayaa soojeedin iyo dood ka yeeshay Hindise sharciyeedka.

**Go'aamada kulanka:**

1. Ansixinta Ajendayaasha kulanka.
2. Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa faray maamulka Golaha in Hindise sharciyeedka Hanaanka Lacag Bixinta Qaran, loo gudbiyo Guddiga ku shaqada leh si ay uga gutaan waajibkooda ugana soo diyaariyaan warbixinta akhrinta 2aad.
3. Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa faray Guddiga Garsoorka, Cadaalada, Arrimaha Diinta iyo Xuquuqul Insaanka Aqalka Sare in ay soo diyaariyaan qodobada laga dooday, iyaga oo la kaashanaya sharciyaqaanada Golaha Aqalka Sare, si loo marsiiyo akhrinta saddexaad.

Ugu dambayntii, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa kulanka soo xiray saacada markay ahayd **12:33 PM**.

**DHAMAAD**